



NUUX OO HELAY DEMBIDHAAF IYO NABAD

Nuux, siddeed sano ayuu Holland joogaa, waana ilaa 26 jir. 'Horraantii 2006 ayaa la i babsiisay, laba bilood kadibna in aanan xaq u lahayn sii joogista Holland ayaa la ii sheegay. Hase yeeshee xasilloonida aan imminka haysto, iyadoo sugnaan la'aantani jirto, ayaa ah mid gaar ah.'

Soomaaliya

Nuux waxa uu ku barbaaray magaala yar oo ku taal koofurta Soomaaliya. 'Mid uun baa iga yaraa ubadka qoyskayaga oo afar ahaa. Haghaga aan lahaa awgeed ayaan qoyskayaga dhexdooda lay tixgelin jirin. Aabbahay si joogta ah ayuu ii garaaci jiray. Muran xagga iskuulka ah ka dib, wuu i jidh dilay. Aayar-aayar ayuu u sii kordhay nacaybka aan u qabo aabbahay. Markaan qiyaastii sagaal jir ahaa ayaa aabbahay guriga hortiisa lagu toogtay, arrintan dhacday awgeed ayaa qoyskayagu wada qaxeen. Intii aannu qaxaynay ayaa hooyaday iyo laba walaalahay ahi ku dhinteen miino ay ku joogsadeen. Aniga iyo walaashay waa nala kala kexeyay. Aniga ciidamadii kacdoonka ayaa kalkaaliye yar iga dhigtay. Markaan lix iyo toban jirsaday ayay ii suurta gashay inaan ka baxsado, anigoo xagga eeddaday oo Itoobiya ku sugnayd u qaxay. Dalkaasi markaas Eritrea ayuu dagaal kula jiray. Soo galooti ahaan ayaa sirdoonku i qabteen si ay ciidanka Itoobiya iigu gacan geliyaan. Mar kale ayey ii suurta gashay inaan baxsado, iyadoo ay eeddaday ii qabanqaabisay safar xagga gabbdheeda oo Ingiriiska jooga. Jabuuti iyo Yaman ka dib meel Yurub ka mid ah ayaa tahriib laygu keenay.'

Mucaskarka Dhallinyarada

Nuux markuu Holland soo gaadhay ayaa, sida qaar kale oo badan oo la mid ah, dacwadiisa magangelyo-doonisti bilaabatay, ka dibna guri dhallinyarada lagu hayo ayaa lagu meeleeyay. 'Gurigaas ayaan markii ugu horreysay noloshayda kula kulmay masiixiyiin.

Sida muslimiin badan oo Soomaali ah ayaan fikrado badan oo gurraacan ka haystay masiixiyiinta. Laakiin, gurigan wax taas aad uga duwan ayaan ku arkay. Mid ka mid ah hawlwaadeennada ayaa ii fududeeyay in aan isku qoro mucaskar dhallinyaro. Waaya aragnimo gaar ah ayey ii ahayd, waayo halkaas ayaan markii ugu horreysay ku wajahay Ciise iyo jacaylka Aabbanimo ee Ilaah. Filim saameyn wayn leh oo ku saabsan dembidhaafka iyo sawiraadda sheekada Inankii Lumay, ayaa anigoo ilmaynaya iga dhigtay inaan aabbahay cafiyo. Taasina waxay igu dhalisay inaan jacaylka Eebbe raadraaco. 'Aabbahaas uu Ciise

Aabbahaas uu Ciise Masiixi Ka hadlayo oo kale ayaan doonayaa inaan lahado.

ka hadlayo oo kale ayaan doonayaa inaan lahado.' Raadraacaasi ma fududayn, ka hor imaadyana wuu la yimid xagga saaxiibady iyo weliba kuwan aan isku waddanka nahay. 'Muslim baad tahay. Muslimna Masiixi ma noqon karo. Ma dhici karto! Taas in lacag ama sharci lagugu siiyo uun baad u samaynaysaa.' Mar walba waxyaabahan ayaa lay hor gudbayey. Igamana hor istaagin raadraacayga.

Dacwadii laga xidhay

Ugu dambayn 2005tii ayaa Nuux dacwadiisii laga xidhay isagoo ku soo dhacay xerada ambabixinta ee Ter Apel. 'Halkaas ayaan ku akhriyay qoraalka Ishacyaah ee Kkitaabka Qoduuska ah oo aan ku maqlay sayidka Eebbe oo dhab ahaan ila hadlaya. Inaan waxba ka baqin ayuu ii sheegay waayo Eebbe qudhiisaa magacayga iigu yeedhy. Inaan kiisa ahay ayuu ii sheegay. Bartan ayaan noloshayda oo dhan Sayidka Ciise ku siiyey. Waxan sannadhihi na dhaafay, mar walba oo aan Ciise baryo dareemayay in had

iyoo goor wax dhacaan. Waxan oo kale weligay hore ulama kulmin. Ciise wuu nool yahay dhab ahaan, wuu maqlaa, ka jawaabaa oo gargaaraa hubaal! Isu dhiibista Sayidka Ciise xorayn heer sare ah ayey la imaatay. Waa waaya aragnima dib ii siisay degganaasho iyo rajo. Si la yaab leh ayaan barya ka dib mar kale u helay meel hooy ah. Booqashooyinkayga kaniisadaha iyo buug aan akhriyay ka dibna inaan weligay dembiyadayda qiran ayaan ogaaday. Dembiyo waawayn iyo kuwa yaryar ayaan sameeyay. Aad baan taas u dareensanaa, waxaana arkay sida dembiyadii aniga iyo Eebbe noo kala dhex taagan yihiin. Dabadeedna, warqad ayaan ku qoray dembiyadayda wixii aan xasuustay. Markii aan qirtayna waxan helay wixii aan intaa goobayay oo idil. Dembidhaaf dhab ah xagga Eebbe Aabaha iyo nabad xagga cagaha Sayidka Ciise.'

Maxaan Masiixi u noqday?

Haddaad ogatay waxa Ciise ii qabtay, markaas inaad Isaga u rukuucdid oo aad u aqbashid Sayidka noloshada uun baa kula gudboonaan lahayd. Soomaali Muslim ah ahaan, ma xaalayn jirin dembi. Ciise ayaan ka bartay inaan dembiile ahay oo markaa loo baahan yahay mid Eebbe kaa maslaxa. Anigu weligay hawlo wanaagsan aan ku kaco kuma hagaajin kareen dembiyadayda, waa wax aan dhici karin, laakiin Ciisaa taas ii sameeyay. Isku tallaaba markii uu saarnaa ayuu dembiyadaydii oo dhan dushiisa saaray, isagaana isu ciqaabay. Sidaas awgeed mahad wayn buu igu leeyahay, waayo waxay ka dhigan tahay inaan lay ciqaabayn. Waxa qudha oo uu i waydiinayaa inaan taas aqbaloo oo aan Isaga si buuxda ugu kalsoonaado. Sidaasna waan sameeyaa, waana sababta aan Eebbe ugu yeedhi karo Aabbe. 2003dii inaan is dilo ayaan doonayey, mase dhicin inaan sameeyo. Imminka waxan arkayaa in Eebbe noloshayda qorshe u hayo. Aayatiin yididiila wayn.

NAME	Nuux	
AGE	26	
COUNTRY LANGUAGE	Somalié Somalisch	

EVERYBODY NEEDS SOMEONE TO BECOME RECONCILED WITH GOD

When he was nine years old, Nuux had to flee from Somalia after his father had been shot dead. In a shelter in The Netherlands he met some Christians for the first time in his life. Because of them he went to a Christian summer camp of 'Stichting Gave'. 'A very special experience for me, because there for the first time I was confronted with Jesus and with the Father Heart of God.' Nuux then started looking for the living God. 'As a Muslim I had no problem with sin. From Jesus I learnt that I am a real sinner and that you need Someone who reconciles you with God. Jesus did that for me.'